

CELEBRATING **20 YEARS** AS THE #1 PERSONAL FINANCE BOOK OF ALL TIME

What the Rich Teach Their Kids About Money –That the Poor and Middle Class Do Not!

RICH DAD
POOR DAD

WITH **UPDATES** FOR TODAY'S WORLD – AND 9 New **Study Session Sections**

ROBERT T. KIYOSAKI

- ***HORDHAC……………………………………………6***
- ***ISGOOLKU NOLOSHA KUMA BARO…………...7***
- ***AMAAN MAALIYADEED WAXA LAGU HELAA AQOON SAX AH………………………………..10***
- ***FAA'IIDOOYINKA AY LEEDAHAY AASAASIDA MASHRUUCAAGA GAARKA AH…………………...13***
- ***XIRFADAHA LAGAMA MAAR-MAANKA U AH DADKA HANTIILEYAASHA AH…………………………………………….....15***
- ***SABABAHA KAA HOR ISTAAGI KARA GUUSHA MAALIYADEED…………………………………18***
- ***Sidee Hanti Loo Dhisaa?...21***
- ***GUNAANAD………………………………………26***

akhris book . 0634062106

Taajiriintu ma shaqeeyaan si ay lacag u helaan , balse lacagta ayaaa iyaga u shaqeysa .

Baro sidii aad lacagta uga dhigi mid adiga kuu shaqeysa .

akhris book . 0634062106

Ku saabsan buugga

Buuggan wuxuu soo baxay sanadkii 1997, wuxuuna ka warramayaa waayo-aragnimada nolosha qoraaga.

Wuxuu ku tilmaamayaa qaabkii uu u bartay casharka ugu muhiimsan ee uu qof baran karo:

Iyo habka saxda ah ee lacag lagu kasbado laguna dhisto hanti lagu gaadhi karo madax-bannaani dhaqaale iyo xorriyad buuxda oo maaliyadeed.

Buuggan oo loo turjumay inta badan luqadaha adduunka, isla markaana xaqiijiyay guulo la taaban karo dhinaca iibkiisa, wuxuu ku barayaa fikradaha aasaasiga ah ee maaliyadda ee uu u baahanyahay qof kasta oo guul doon ah, iyo hababka wax ku oolka ah ee lagu dhisi karo ganacsi koraya oo kobcaya .

akhris book: 0634062106

Ku saabsan qoraaga

Robert Kiyosaki waa maalgashade , ganacsade, qoraa, iyo macallin ku xeel dheer wacyigelinta dhaqaalaha.

Wuxuu qoray 26 buug oo taxane ah, kuwaas oo caan ka noqday caalamka.

Buuggiisa ugu caansan, **Aabbaha Taajirka ah iyo Aabbaha Saboolka** ah, wuxuu sanado badan ka mid ahaa buugaagta ugu iibka badan ee liiska **New York Times** wuxaana lagu turjumay in ka badan 51 luqadood, iyadoo la iibiyay in ka badan 30 milyan oo nuqul .

Kiyosaki wuxuu si wadajir ah ula qoray madaxweynihii hore ee Maraykanka, ***(iyo haatan)*** **Donald Trump,** buugga lamagac baxay **Maxaan U Doonaynaa Inaad Taajir Noqoto** – **Labo**

akhrisbook : 0634062106

Nin, Hal Farriin, kaasoo noqday buugga #1 ee liiska **New York Times**.

Waxa kale oo uu hal abuuray ciyaarta waxbarashada dhaqaalaha ee "**Cashflow"** oo loogu talagalay horumarinta xirfadaha maamulka maaliyadeed .

Cidda uu ku haboon yahay :

- Qof kasta oo ka daalay shaqada iyo rootiinkeeda joogtada ah ee mustaqbalkeedo xadidanyahay .
- Qof hammi iyo rajo leh, doonayana inuu ka boodo xayndaabka saboolnimada iyo duruufaha una guuro hodannimo maskaxeed iyo mid maaliyadeed.
- Dhaqaale-yahan kasta oo raba inuu fahmo fikradaha muhiimka ah ee maaliyadeed .
- Qof kasta iyo bulsho kasta oo raba horumar iyo guul dhab ah.

akhris book .0634062106

HORDHAC

Haddii aad ka mid tahay dadka aan doonayn in ay noloshooda inteeda badan ku lumiyaan shaqooyin dakhligoodu hooseeyo, oo aad leedahay qorsheyaal waaweyn oo aad ugu hamiyeyso inaad gaadho madax-bannaani dhaqaale – haddaba waxaad joogtaa meesha saxda ah.

Halkan waxaad ka ogaan doontaa farqiga weyn ee u dhexeeya caqliyada dadka taajiriinta ah iyo hab fikirka dadka saboolka ah.

Robert Kiyosaki wuxuu ku guuleystay in ku soo jiito dareenka dad badan buuggiisa caanka ah ee "Aabbaha Taajirka ah iyo Aabbaha Saboolka ah", kaas oo uu ku soo bandhigay qorshe dhab ah oo lagu kasbado lacag laguna gaadho himilada shakhsiga ah.

Wuxuu ku sharxay farqiga u dhexeeya nolosha aabbihiis —oo ahaa shaqaale sare oo dowladeed, kuna guuleystay heerar

akhrisbook .0634062106

tacliineed oo sare— balse ugu dambeyn ku soo dhamaaday mushahar howlgab ah oo kooban, carruurtiisiina dhaxashiiyay deyn iyo saboolnimo, iyo aabbaha dhalay saaxiibkiis —oo aan xitaa dhamaysan waxbarashada hoose balse u leexday ganacsiga xorta ah, kuna dambeeyay inuu noqdo mid ka mid ah dadka ugu hantida badan, ugana tagay carruurtiisa hanti ballaaran.

ISGOOLKU NOLOSHA KUMA BARO

Maxuu yahay waxa dhabta ah ee aan uga baahanahay dugsiyada?

Wax ka mid ah culuumta sayniska , iyo wax badan oo aan maskaxdeena ku buuxinno si aan ugu gudubno waraaqaha imtixaanka— imtaxaanka ka dibna, badankooda uma baahanno .

akhris book : 0634062106

Waxa ay dugsiyadeennu ka liitaan waa baridda maaddooyin wax ku ool ah oo nolosha lagama maarmaan u ah, sida wacyiga dhaqaalaha (aqoonta maaliyadeed).

Tani waa sababta dhabta ah ee keentay korodhka dadka saboolka ah sidoo kale waa sababta ay dad badani ugu aaminsanyihiin lacagta fikrado khaldan.

Waxay dugsiyada badankoodu diiradda saaraan waa in ardaygu helo darajooyin sare si uu u helo shaqo fiican oo dawladeed. Qaybtaas dhan ee bulshada ka midka ah waxay aaminsan yihiin in dawladda ama shirkadda ay ka shaqeeyaan ay tahay tan kaliya ee masuul ka ah daryeelka noloshooda iyo qoysaskooda.

Sidaas darteed, fikirka kaliya ee ay leeyihiin wuxuu ku kooban yahay sidii ay u heli lahaayeen mushahar sare, hawlgab fiican, iyo fasaxyo caafimaad .

Kuwa aaminsan in shaqaalanimadu tahay jidka ugu fudud ee lagu helo amaan dhaqaale ,waa kuwa uu tirsanaa aabbaha Kiyosaki, kaas oo noloshiisa oo dhan ku dhameeystay inuu madaxdiisa raali galiyo ,isagoo khasaariyay fursadihii uu ku noqon lahaa nin taajir ah.

akhris book : 0634062106

Si kastaba ha ahaatee, wuxuu weli doonayay in wiilkiisu raaco dariiqiisii—waan wax aan si fudud ugu tilmaami karno “hab-fikirka dadka saboolka ah.”

Dhanka kale, caqliyada dadka taajiriinta ah—sida aabbaha dhalay Kiyosaki saaxiibkiis —waxay ku dhisan tahay rumaysnaanta karti maaliyadeed, iyo isku-tashi buuxa, si uu qofku ugu guulaysto inuu lacag sameeyo .

Intii uu aabbaha saboolka ahi lahaaa “jacaylka lacagtu waa asalka shar kasta,” aabbaha taajirka ahi wuxuu lahaa “faqrigu waa asalka musiibooyinka oo dhan.”

Waxa ugu qiimaha badan ee qofku nolosha ka baran karo waa habka ay u fekeraan taajiriinta.

Sida aabbaha saaxiibka Kiyosaki oo ahaa isha fikiradaha midho-dhalka ah ee aan la soo koobi karin, wuxuuna casharkii ugu horreeyay siiyay Kiyosaki isagoo sagaal jir ah—wuxuu ahaa: **“taajiriintu uma shaqeeyaan lacagta, lacagta ayaa u shaqeysa iyaga.”**

akhris book . 0634062106

Qof kasta oo noloshiisa ku dhammaysta raadinta lacag, wuxuu ahaanayaa sabool.

Halka taajiriintu ay dadka kale ka dhigtaan kuwo u shaqeeya. Waxayna u galaan raadinta fursado qiimo leh, halka dadka saboolka ahi aysan doonayn in ay ka baxaan aagga raaxada ee amaanka shaqada, taasoo micnaheedu yahay inaysan khasaarin sababtoo ah waxay ka baqeen xitaa inay wax iskuma dayaan—waxayna ku ekaadaan mushahar kooban oo xaddidan.

AMAAN MAALIYADEED WAXA LAGU HELAA AQOON SAX AH

Aqoonta saxda ahi waa wacyiga maaliyadeed

nasiib darro taasi waa aqoonta aysan helin dadka saboolka ah—xitaa carruurta dadka hodanka ah waxay ku bartaan

akhri book : 063406210

guryahooda, halka kuwa saboolka iyo kuwa dakhligoodu dhexdhexaadka yahay aysan ka helin dugsiyada iyo guryahooda toona.

Sidaas darteed, waxa soo kora jiil haysta faham qaldan oo la xidhiidha dhaqaalaha iyo lacagta .

Wacyiga maaliyadeed wuxuu qofka baraa sida ay taajiriintu u fekeraan—taas oo ah in lacagtu u shaqeyso iyaga, ee aanay iyagu u shaqeynin si lacag darteed .

Muhiim ah ma aha inta ay le'egtahay lacagta aad kasbato, balse waxaa muhiim ah inta aad kaydsato si aad mustaqbalka u maalgashato .

Waxaa suurtagal ah in la gaadho heerkan marka la fahmo farqiga u dhexeeya *hantida jeebkaaga wax kusoo darta* (assets) iyo *tan jeebkaaga wax ka saarta* (liabilities).

***Hantida jeebkaaga wax kusoo darta* (Assets):** Waa wax kasta oo lacag kuu soo saara.
***tan jeebkaaga wax ka saartana* (Liabilities):** Waa wax kasta oo keenaya inay lacag kaa baxdo ama kugu noqda kharash

akhris book :0634062106

joogto ah sida gaadhiga aad isticmaalayso kuriga kuu kiraysan iyo xataa haduu yahay giri aad leedahay oo jeebkaaga lacag kasaaraya .

Tusaale ahaan, guriga aad hadda soo iibsatay wuxuu ka mid noqon karaa *liabilities* (*hantida* ***jeebkaaga wax ka saartana)*** ileen lacag buu jeebkaaga kasaaraye .

Laakiin haddii aad leedahay saamiyo ganacsi ama guryo aad kiraynayso ama sii iibsanayso si aad faa'iido uga hesho, markaas waxay ka mid noqonayaan *assets* (hanti faa'iido leh).

Fahamka farqigan ayaa ah waxa ay taajiriintu kaga duwanyihiin dadka saboolka ah.

Dadka saboolka ahi waxay mar walba ku dhacaan qald maadaama aysan kala garan karin hanti faa'iido leh iyo mid khasaaro keeneysa.

Halka taajiriintu ay ku dadaalaan inay dhisaan ganacsiyo iyaga u gaar ah, si ay uga dhigaan *assets* u shaqeeya iyaga.

akhris book : 0634062106

FAA'IIDOOYINKA AY LEEDAHAY AASAASIDA MASHRUUCAAGA GAARKA AH

Dareenka ugu khatarta badan ee dilaya riyada dadka saboolka ah waa *cabsi* iyo *hunguri* .

Cabsidu waxay keentaa inay ka baqaan katagista shaqada , halka hungurigu keeno raadinta mushahar joogto ah kadib sidaas lagu ilaawo muhiimada ay leedahay kobcinta hantida . Laakiin taajiriintu waxay leeyihiin geesinimo iyo dhiirranaan ay fursadaha uga faa'iidaystaan, waayo fursadaha waaweyni waxay u yimaadaan dadka leh awoodda go'aan qaadashada – kuwaas oo noqda madax .

Sidaa darteed, waa in aad la timaadaa dhiirranaan aad ku aasaasto mashruucaaga gaarka ah, si aad u noqoto madax-waynaha naftaada.

akhris book . 0634062106

Mid ka mid ah faa’iidooyinka ugu waa weyn ee laga helo ganacsiga kuu gaarka ah waa **yaraynta culayska canshuuraha** .

Shaqaalaha mushaharka qaata waxaa lagu soo rogaa canshuur go’an oo laga jaro mushaharkooda, taasoo micnaheedu yahay inay bixiyaan canshuur ka hor inta aysan wax kharash ah bixin, kadib waxay isticmaalaan waxa soo hadha .

Halka ay sharciyada canshuuraha u oggolaanayaan shirkadaha inay marka hore qarash gareeyaan mashaariicdooda iyo hawlahooda si ay ugu adeegaan danahooda ganacsi, kadibna canshuurtu laga jaro waxa soo hadhay oo keliya;

waxaa intaa dheer in shirkado badan ay biilashooda khaaska ah sida gawaarida shirkadda, alaabta xafiisyada, iyo kharashaadka cunto iyo cabbitaan ay ku daraan qarashaadka guud ee mashruuca .

Tani waxay shirkadaha siisaa fursad ay ku maareeyaan sharciyada canshuuraha, taasoo sababaysa inay canshuur kabixiyaan waxa soo hadhay oo keliya, marka labixiyoo dhamaan kharashaadkii .

Mashruucaaga gaarka ah wuxuu kuu suura gaalinayaa inaad kaashatid kana faa’iidaysatid dad kaa xirfad badan adigoo

akhris book . 0634062106

shaqaaleysiinaya si ay u kobciyaan hantidaada adiga oo aan dadaal badan bixin .

Tani waxay kuu suurtagelinaysaa in aad hesho natiijooyin wanaagsan oo degdeg ah, isla markaana aad ka hortagto wakhti lumis ay sababi karaan shaqaale aan khibrad lahayn ama aan xirfad lahayn.

XIRFADAHA LAGAMA MAAR-MAANKA U AH DADKA HANTIILEYAASHA AH

Si aad u gasho dunida dadka taajiriinta ah iyo kuwa guuleystay, waa in aad fahmtaa muhiimadda uu leeyahay **garaadka maaliyadeed .**

Si kastoo qofku u leeyahay garaad dabiici ah, iyo caqli shakhsi ah oo ku shashay taasi uma dammaanad qaadi karto inuu helo maal; balse **aqoon sax ah iyo garaad maaliyadeed oo qoto**

akhris book 0634062106

dheer ayaa horseeda guusha joogtada ah iyo qofku hantidiisa ka ilaaliyo khasaare .

Si aad uyeelato garaad maaliyadeed :

- Waa inaad si wacan u qabato shaqada aad hayso hadda – **isla markaana waa inaad wax kabarataa** , ee kaliya inaad ha u qaban si aad mushahar u hesho.
- **Baro xirfadda wax iibinta iyo suuq-geynta** – waana mid ka mid ah furayaasha ugu muhiimsan ee guusha dhaqaalaha.

Hab-dhaqanka ay leeyihiin dadka taajiriinta ah:

- Waxay **baadhaan hibadooda qarsoon** iyagoo qaata khataro xisaabsan, raadinayana fursado dahsoon, halkii ay ku mashquuli lahaayeen hawlo maalinle ah oo hal meel taagan sida shaqaalaha caadiga ah .
- Waxay bartaan sharciyada ku saabsan ganacsigooda, maareynta xisaabaadka, maalgashiga, iyo sida suuqu u shaqeeyo.
- Waxay horumariyaan: **xirfadaha sida loola dhaqmo bini'aadanka kale** iyo **xirfadaha aqoonta oo ah sidii ay**

akhris book : 0634062106

u heli lahaayeen xogaha ka maqan una adeegsan lahaayeen .

Su'aasha ugu muhiimsan ee qof walba laga raba inuu is waydiiyo waa :

"Shaqada aan hadda hayo, xaggee ayay ii wadaa mustaqbalka?"

Jawaabta su'aashan waa **hagaajiyaha ugu weyn ee isbeddelka noloshaada**.

Saddexda xirfad ee maamulka maaliyadeed ee ay taajiriintu yaqaanaan:

1. **Maareynta qul-qulka lacagta (Cash Flow):** Fahamka farqiga u dhexeeya *hantida soo saarta lacag* iyo *tan adiga wax kaa jarta* si ay hantidu kor ugu kacdo waxa ku soo galayana uu uga bato waxa kaa baxaya .
2. **Maareynta nidaamka:** waa maamulka naftaada, waqtiyadaada, qoyskaga, iyo guud ahaan nidaamka noloshaada.

akhris book : 0634062106

3. **Maareynta dadka:** waa nidaaminta shaqada iyo shaqaalaha iyadoo lagu saleynayo xirfadooda iyo kartidooda shakhsi iyo kooxeed .

Taajiriinta – Xeerka Bixinta :

“Bixi si aad u hesho” – Dadka taajiriinta ah ma dayacaan wax bixinta , waxayna si firfircoon uga qayb qaataan mashaariicda samafalka iyo caawinta bulshada .

akhrisook : 0634062106

SABABAHA KAA HOR ISTAAGI KARA GUUSHA MAALIYADEED

Marka aad kasbato aqoonta maaliyadeed ee lagama maarmaanka ah, wali waxaa jira caqabado hor istaagi kara horumarkaaga xagga lacagta iyo samaynta qul-qul maaliyadeed oo joogto ah.

Caadi ahaan, caqabadahan waxay kor u qaadaan khasaaraha (liabilities) isla markaana hoos u dhigaan hantida (assets), waxaana ugu waaweyn shan sababood oo muhiim ah:

1. Cabsi iyo Baqdin

Dadka badankoodu ma jecla inay lumiyaan lacag, laakiin cabsada ay ka qabaan khasaaraha ayaa ka hor istaagta inay tijaabiyaan fursado cusub.

Cabsidu maaha mushkiladda dhabta ah, balse waa sida aad uga falceliso khasaaraha.

Marka aad fahamto in khasaaruhu yahay **qayb ka mid ah wax-barashada**, waxaad u arki doontaa wax iska caadi ah.

2. jees-jeeska

Mar kasta oo aad bilaabeyso fursad cusub, waxaad arkaysaa dad kugu qosla kugu jees-jeesa ama ku niyad jebiya.

akhris book : 0634062106

Waxa sababi kara inuu saameyn kugu yeesho jees-jeeskoodu waa dareenka naftaada oo u nugul in waxyaabaha lagugu durayo ay cabsi kugu beeraa laakiin waxaa lagaa rabaa inaad ku gaashaamato go'aan adag iyo geesinimo joogta ah ,iskana indho tirid kuwa kug jees jeesaya oo aad sii wadid dadaalkaaga.

3. wahsiga :

Wahsigu wuxuu carqaladeeyaa horumarka. Si aad daweyso wahsiga su'aal muhiim ah u weydii naftaada:

"Maxaan ka faa'iidayaa shaqadan ama mashruucan?" Rabitaanka faa'iidada ayaa kaa kicin kara oo kor u qaadi kara tamartaada.

4. caadooyinkaaga Dhaqaale Oo Xun

Hab-dhaqankaaga maaliyadeed wuxuu dhisayaa ama burburiyaa noloshaada dhaqaale. Waa muhiim in aad waqti geliso **dhisidda caadooyin maaliyadeed oo fiican** sida kaydsiga , barashada

akhris book : 0634062106

maalgashiga, iyo iska ilaalinta kharashaadka aan muhiimka ahayn.

5. Islaweynida iyo Jaahilnimada

Qaacidaa jirta tidhaahda “Wax kasta oo aad taqaan waxay ka qayb qaataan koboca hantidaada, laakiin wixii aadan garanayn waxay lumiyaan fursadaha aad lacag ku heli lahayd.

Si aad uga fogaato khasaaraha waa in aad marka hore wax barato, oo aad isu dhul dhigto u (tawaaducdo) si
aad u hesho aqoon .

akhbook . 0634062106

Sidee Hanti Loo Dhisaa?

Ilaa hadda waxa aad baratay waa uun aasaaskii iyo sal dhigii naftaadu u baahnayd intaa wixii ka danbeeya wuxuu kaa caawin

doonaa inaad kor u sii socotid ilaa halka ugu saraysa waana toban talaabo oo lagama maarmaan ah .

1. Rumaysnaata Naftaada

Waxaad u baahan tahay inaad aaminsanaato kartidaada.

Ogsoonow dad badan oo doonaya inay hodmaan waxay niyad-jabaan marka ay la kulmaan dhibaatooyin.

Laakiin adigu sidaas ha noqon.

Wadada hanti-dhiska waa mid dheer oo u baahan dulqaad iyo adkaysi ma ahan wax sahlan .

2. Xirfadda doorashada saxda ah waa lagama maarmaan

Maalin kasta baro sida go'aan sax ah loo qaato.

Noloshaada mustaqbalka waxa lagu cabbiri doonaa tayada go’aamada aad maanta gaadho.

akhris book : 0634062106

3. Ka Fogoow Xidhiidhada Qaldan

Ha la xidhiidhin dad kaa hor istaagaya horumarkaaga. Saaxiibada xunxun waxay kaa lumiyaan fursado iyo waqti qiimo leh .

4. si fiican u sug xirfadaada hadda

Ha ku degdegin inaad barato wax cusub ilaa aad si fiican u baratid waxa aad hadda ku shaqaynayso .

5. Xakamee Naftaada

Ha ku dhex dhicin deymo badan.

Hana taaban keydkaaga hadayna jirin duruufo ku qasba . kaasho gaaraadkaaga maaliyadeed oo shaqee waqtiyada adag si kayd kaagu u bad baado .

aktris book : 0634062106

6. uquudh Xirfadlayaasha

Ha ka baqin inaad si wanaagsan u siiso lacagta dadka xirfadlayaasha ah eed u baahantahay

Waayo xirfadlayaashu waxay kuu fududeeyaan wadada guushaada.

7. baadh Fursadaha Dahabiga ah

Raadi fursado aad faa'iido ka helayso adigoo aan kharash badan galin. Iibso wax aad ku kalsoontahay in faa'iido degdeg ah ka iman doonto.

8. Kobci Hantidaada

Hantida dhabta ahi waa tan kuu soo saarta dakhli joogto ah.

akhris book . 0634062106

9. Raadi Qof Kuugu Dayasho Mudan

Raadi qof noloshaada ku dhiirrigeliya oo aad ku dayato. Khibradda uu leeyahay waxay kaa badbaadin kartaa khaladaad badan.

10. Dadka Bar Wax anfacaya

Markasta oo aad dadka bartid wax qiimo leh, waxaad adiguna helaysaa faa'iido ka badan waxa aad bixisay. Ha kala bakhaylin aqoontaada iyo khibradaada.

Ugu Dambeyn: Ha Joojin wax Barashada!

Mar walba sii wad inaad barato. Ka qaybgal koorsooyin, akhri buugaag, dhegeyso barnaamijyo faa'iido leh, oo had iyo jeer raadi fursado cusub. Kexee gaadhigaaga toban daqiiqo bil kasta si aad soo raadisid fusado dahabi ah !

akhris book : 0634062106

GUNAANAD

Kiyosaki wuxuu sameeyay ciyaar waxbarasho oo uu ugu magac daray **"Cashflow" (qul-qulka Lacagta)**, taas oo si dhab ah u metelaysa sida ay dadka taajiriinta ahi u ciyaaraan **ciyaarta lacag kasbashada**. Buuggani wuxuu sharaxaad faahfaahsan ka bixiyay falsafadda ciyaartan iyo wax walba oo uu ka bartay "aabbihiisa hodanka ah" oo ay tahay in laraaco iyo "aabbihiis saboolka ah" oo ay tahay in laga fogaado .

Waxyaabaha muhiimka ah ee laga baranayo waxaa ka mid ah :

- In **shaqaalanimadu** aysan kuu saamaxaynin inaad dhisto hodontinimo .
- In **dugsiyada** iyo nidaamka waxbarashada ee caadiga ahi aysan bixin waxbarasho maaliyadeed oo ku filan, taas oo ay taajiriintu carruurtooda si gaar ah u baraan.
- In **xorriyadda maaliyadeed** tahay bartilmaameedka ugu weyn ee nolosha maaliyadeed.

akhris book : 0634062106

Tani waxay la micno tahay:

Inaad lacag hesho adigoon si toos ah u shaqayn.

Taas waxaad ku gaadhi kartaa in :

Dakhliga kaaga yimaada **hantidaada (assets)** uu ka bato **kharashaadka joogtada ah (liabilities)** ee noloshaada.

akhris book : 0634062106